

**"Kalogay
ma ihi"**

**"In la cadsato
caawimo waa in
masuuliyada la
qaado"**

**"Waxaa
jirta
rajo"**

**"Anigu
qiimo weyn
ayaan
leeyahay"**



Xidhiidh

Nala soo xidhiidh haddii aad rabto inaad wax dheeraad ah ka ogaato ama iska diiwaan geliso mid ka mid ah kooxaha ama waxbarashada.

Telefoonka:
063-14 40 57

Cinwaanka booqashada:

Postgränd 8 A
831 30 Östersund

OK 2022-09

**Social- och
arbetsmarknadsförvaltningen**

Östersunds kommun, 831 82 Östersund
063-14 30 00, www.ostersund.se



**FAMILJE-
LOTSEN**



**Ma u baahan tahay qof aad ka
wada xaajootaan ama qof aad
kala hadasho barbaarinta?**

Nagala soo xidhiidh Familjelotsen! Waxaan u joognaa qoysaska degmada Östersund ee carruur leh 0-17 sano. Familjelotsen waxuu bixinayaan taageerada wada hadalka, waxbarashada waalidka iyo kooxaha taageerada.



Taageerada wada hadalka

Familjelotsen waxay kuu soo bandhigaysaa waalid ahaan, ama qaraabo kale, taageerada wada hadal gaaban. Haddii loo baahdo, waxaan sidoo kale la kulmi karnaa ilmaha/dhallinyarada. Waad nala soo xiriiri kartaa si aad ula hadasho qof kale wax ku saabsan waalidnimada iyo welwelka maalinlaha ah ee la xiriira carruurta iyo dhalinyyarada.


- Wadahadaladu waxa ay ku saleysnaan doonaan waxaad rabto inaad ka hadasho. Waaan si wadajir ah u sameyn neynaa qorshe adiga iyo qoyskaaga ku habboon
- Haddii ay soo baxdo inaad u baahan tahay taageero ballaaran, ama nooc kale oo taageero ah, waan ku sii hagi karnaa/ku sii tilmaami karnaa. Haddii aad rabto, waxaanu sidoo kale kaa caawin karnaa inaad codsato taageero kale
- Shaqadeennu waxa ay ku salaysan tahay si tabarruc ah oo adiga ayaa go'aan ka gaaraya marka aad rabto inaad joojiso xiriirkha naga dhxeeyaa
- Wada hadalku waa lacag la'aan oo aan la diiwaangelin
- Waxaa na saaran waajibaad sirta laakiin waxaa ku jiro waajibaad ka warbixinta. Sharcigu waxa nagu waajib ah in aanu u sheegno adeega bulshada hadii aanu ka shakino in ubadku ay dhibaato soo gaadhayso

Balanbaalis




Kooxaha taageerada ee carruurta da'doodu u dhaxayso 7-17, waalidinta iyo dadka waaweyn, ee ku nool ama ku noolaa qoys cudurka dhimirka qaba ama qof la qabsaday khamriga ama daroogooyinka kale.

Xumbo



Kooxda taageerada ee carruurta da'doodu u dhaxayso 7-12, oo waalidkood ay kala tagteen.

Geedka



Kooxda taageerada carruurta iyo dhalinyyarada da'doodu u dhaxayso 7-17, kuwaas oo lagu meeleyay guri lagu daryeelo carruuta

Waalidka Östersund



Waxaa loogu talagay adiga leh carruur iyo dhalinyyaro da'doodu u dhaxayso 0-17 kuna nool degmada Östersund. Waxaan u gudbinaa aqoonta ku saabsan carruurta, nolosha qoyska iyo waalidnimada si aan nolol maalmeedka uga dhigno si habسامي leh. Waa bilaash inaad nala soo xidhiidho ama ku biirto kooxdeena waalidnimada iyo Muxaadarooyinkeena.

Waxaa jira kooxo waalidnimo oo ku habboon xaalado kala duwan, sida:

- sida aad uga shaqayn karto xidhiidh wanaagsan oo aad ilmahaaga la yeelato
- sida adiga waalid ahaan aad sameyn karto si ay u yaraato dhibka guriga
- sida aad u caawin karto ilmahaaga ka dib markii aad waalidku kala tagaan, ama
- waxa laga yaabo inaad u baahato inaad ogaato, waalidka ku cusub Iswiidhan

Waxaad sidoo kale ka heli kartaa talooyin iyo macluumaadka la xiriira barbaarinta Östersund adigoo naga soo raacaya

Facebook:

www.facebook.com/foralderostersund